



King County



Redistricting KING COUNTY

Ma dooneysaa inaad si dhow u eegto? Eeg khariidadeena sheekoooyinka oo ku saabsan degmooyinka hadda ka tirsan Golaha Deegaanka ee Gobolka King

Bulshooyinka ayaa xoog badan markay wax u wada codeyn karaan

Gudiga Xuduudeynta Degmada King ee 2021 waxaa loo xilsaaray dib u qaabeynta xuduudaha degmada ee Golaha Deegaanka ee Gobolka King iyadoo lagu saleynayo tirakoobkii ugu dambeeyay. Mid ka mid ah waxyaabaha ay guddigu tixgelinayaan waa bulshooyinka laga dan leeyahay. Guddigu wuxuu rabaa inuu kaa dhageysto wax ku saabsan bulshadaada iyo waxa ka dhigaya mid gaar ah.

Guddigu wuxuu u baahan yahay fikradaada si ay u fahmaan halka bulshadaadu ka bilaabato iyo halka ay ku dhammaato. Waxaa jira seddex qaab oo aad sidaas u sameyn karto:

1 **Nagala soo qaybgal kal-fadhiga dhageysiga bulshada**

Guddigu wuxuu qabanayaa kal-fadhiyo taxane ah oo lagu dhageysanyo fikradaha bulshada, bilaha Luulyo iyo Agoosto iyo shirarka ka dhacaya magaalada marka la gaaro xilliga deyrta. Jadwalka iyo rsvp ka eeg kingcounty.gov/districting.

2 **Qaado sahankeena**

Booqo [websaydhkeena](#) si aad u qaadatid sahankeenna oo aad fikradaada ugu gudbiso guddiga (sahanka waxaa lagu heli karaa luqado badan).

3 **Iimayl noo soo dir**

Faallooyinkaaga, su'aalahaaga, welwelkaaga ama codsiyada tarjumaadda iimayl ahaan ugu dir districting@kingcounty.gov.

Maxaa bulshadaada ka dhigaya mid ka duwan bulshooyinka ku xeeran?

Ma jiraan jardiinooyin, suuqyo ama aagag kale oo xarumo ama goobo lagu kulmo u yihiin bulshadaada?

Haddii aad bulshadaada ku sawiri lahayd khariidad sidee u ekaan lahayd?



Chair Ann Schindler



Sophia Danenberg



Paul Graves



Cheryl Jackson-Williams



Rob Saka

Waa maxay Degmada King County?

King County waxay adeegyo "goboleed" u fidisaa gobolka oo dhan, adeegyadaas oo ay ku jiraan caafimaadka bulshada, doorashooyinka, Gaadiidka Metro, nadiifinta biyaha wasakhda ah, uruurinta qashinka adag, nidaamka cadaaladda dembiyada ee gobolka iyo jardiinooyinka Gobolka. Meelaha aan la aqoonsanayn, Degmadu waxay ugu adeegtaa sidii dawladda hoose ahaan waxayna u fidisaa adeegyada sharci fulinta, jidadka iyo buundooyinka, oggolaanshaha iyo horumarka, iyo adeegyada kale ee dawladda hoose. Golaha Deegaanka King waa laanta sharci dejinta ee gobolka oo kormeerta dowladda labaad ee ugu weyn ee ka jirta gobolka. Wuxuu ka kooban yahay sagaal xubnood oo laga soo doortay sagaal degmo oo kala duwan oo gobolka oo dhan ah.

Waa maxay Gudiga Xuduudeynta Degmada King?

Gudiga Xuduudeynta Degmada King waa guddi madax-bannaan, oo aan dhinacna u janjeedhin oo ka kooban afar xubnood oo ay soo magacaabeen Golaha Deegaanka ee King iyo xubin shanaad oo ay soo xusheen guddiga oo sidoo kale u adeega guddoomiye ahaan. Mas'uuliyyadda keliya ee Guddigu waa dib-u-qaabeynta degmooyinka Golaha Degaanka 10-kii sanaba mar iyadoo lagu saleynayo tirakoobka ugu dambeeya ee tobant-sanadlaho ah si markaa dib-u-dheellitir loogu sameeyo dadka ku nool degmooyinka si ay markaa ku dhowaad ay ugu simanaadaad bulsho ahaan.

Maxay fikrad ka dhiibashada hawsha xuduudeynta ay muhiim u tahay?

Ilaa iyo inta suurtagal ah, xuduudaha degmada waa in loo sawiraa si loo ilaaliyo bulshooyinka jira ee isku xirnaanta iyo danta wadaaggaa ah. Bulshooyinka ayaa inta badan ah kuwo xoog badan markay wax wada dooran karaan oo aynaan u kala qaybsanayn degmooyin badan. Guddigu wuxuu rabaa inuu maqlo halka aad ku nooshahay iyo inay jiraan kooxo dad ah oo ka tirsan bulshadaada oo wadaaga dano guud ama welwelo ay tahay in laga ogaado xuduudaha degmada cusub ee Golaha Deegaanka. U sheeg guddiga waxa bulshadaada ka dhigaya mid gaar ah, halka ay ka bilaabato iyo halka ay ku dhammaato.